

## Sida looga baaro helikobakteeriyada saxarada

Qaar ka mid ah daawooyinka ayaa haddii aad cunto saamayn ku yeelanaya maxsuulka testigan. Si daas aawadeed ayaa waxaan kuu soo jeedinaynaa in aadan laba todobaad isticmaalin daawooyinka ay, ku jirto birta loo yaqaan Bismuth (afka finnishka: vismutti) (sida Tannopon, Pylorid ja De-Nol) ama Proton pump inhibitor (sida. Lanzo®, Losec®, Nexium®, Omeprazol, Pariet®, Somac®, Zolt®). Daawooyinka antibiyootiga ah waa in laga joogo markii ugu dambaysay ee aad isticmaasho ugu yaraan afar todobaad. Talooyinka lagu siiyey oo aad sida ay yihiin u raacdaa waxay suurto gali naysaa in maxsuul lagu kalsoonaan karo la helo. Haddii aad samayso sida lagugula taliyey si khi-laafsan, u sheeg qofka saamiga kaa qaada.

### Qalabka loo baahan yahay in saamiga lagu qaado

Xarunta caafimaadka ama isbitaalka shaqaalihis ayaa ku siinaya qalabkii aad ku qaadi lahayd saxarada oo ah baakad yar oo godan ama shay kale oo u dhigmi kara (sida; saxamda waraaqda ah ee halka mar la isticmaalo), saamiga saxarada dhaladii dhuubnayd oo lagu ridayey, bac lagu rido oo lagu soo xiro iyo warqaddii magaca lagu qorayey.

### Sida saamiga saxarada loo qaado

Marka hore ku saxarood baakada godan ee kartoona ka samaysan ama saxan wan taaymmuyuus ah oo warqad ka samaysan. Waxaad saxarada kaga qaadaa xantoobo yar oo suul mugiis le'eg qaadada dhalada saxarada lagu ridayo qaadada ku jirta. Ka dibna daboolka si taxadar leh u xir. Si loo ogoodo qofka saamiga laga qaaday waa muhiim inaad caagga ama dhalada saamiga ku soo dhajiso warqadda magaca lagu qoro, taas oo aad ku soo qortay magacaaga, lambarka aqoonsigaaga iyo wakhtiga saacadda iyo taariikhada aad saamiga iska qaaday. Dhalada saamiga ku jiri ku rid oo ku xir bacda. Waxaad keentaa dhalada saamiga ku jiro shaybaarka isla maalinta aad qaadayba ama ugu dambayn maalinta ku xigta subaxeeda. Saamiga waa in lagu hayo meel qaboow, sida talaagada ama fidinjiteerka.

Haddii aad qabto wax su'aal ah waxaad soo wici kartaa oo weydiin kartaa lambarka adeegga oo ah 09 471 86800 Isniinta - Jimcaha saacadda 7.30-15.30. DIGNIIN! shayrbaarku jawaabta saamiga taleefan kuma sheego.